Gaadiidka Dadweynaha ee magaalada San Deigo

Gadiidka Baska

Magalaada San Deigo waxa ay leedahay gadiid dadweyne oo joogto ah. Waxa aad ku geyn kara meel kasta oo aad dan uga yeelato magaalda gaadiidkaas. Waxa lagama maarmaan ah in aad hore u qorsheyso socdaalkaaga kaasi oo kuu fududaynaya in aad gaadhid wakhti sugan goobtii aad rabtay. Hadii aad u baahato wax macluumaad ah oo ku saabsan arinka gaadiidka dadweynaha, la xidhiidh telefoonka 619-238-0100 ama booqo mareegta (website).

Maabka baska iyo jadwalka wakhtiga baska waxaad ka heli kartaa IRC, makatabad, baska dhexdiisa iyo rugta gaadiidka eek u taala faras magalha San Diego.

Siyaabo fara badan baad u bixin kartaa lacgta baska. Waxaad bixni kartaa lacag cadaan ah, ama waxaad adeegasan kartaa tookanada baska, ama tigidh aad bishiiba mar iibasan karto. **Lacagta baska lagu bixiyaa waxay u kala qaybsantaa:**

- Goobaha dhow waxaa weeye **$1.75.** Waxaa jira marmar ay lacgatu noqon karto **$1.50 – 4.00.**
- Degmada waqooyi (North County) lacagtiisu waa **$1.75**
- Lacgta daka waayeelka waa **$ 1.00**

Tigidhada Bisha

- Tigidhada dadka waaweyn waxaa ay ka bilowdan $58.00-$84.00 waxay ku xidhan tahay degaanka aad u socto waxaana lagu raaci karaa trolliga
- Tigidhada dadka yaryar (6-18) waxa weeye $29.00, waxaana lagu raaci karaa trolleyga
- Dadka waayelka ah iyo dadka curyaanka ah waa $ 14.50 waxana lagu raaci karaa trolleyga

Dadka waayeelka ah iyo dadka curyaamiinta ah

Si aad xaq ugu yeelatid qiimo jaban waa in aad ahataa ama aad ka weynaataa lixdan (60) jir. Qiimaha jaban waxaad ku heli kartaa ado tusa warqada aqoonisga ee transitka, ama warqada Medicare ka, ama warqada California Senior ID, ama aqoonsiga wadaha oo aan mudaddisu dhicin. Waqqada aqoonsiga oo loo yaqaan Transit ID waxaad ka heli kartaa dukaanka gaadiidka waxaanay ku kacaysaa $6.00.

Dadka curyaamiinta ahi waa in ay si xoog ah u qabaan dhaawac kor ama mis maskaxiyan ah. Dhaawacu waa in uu ahadaa mid joogto ah. Dhaawacu waa in uu ahadaa mid muuqda ama aad warqad ka haysataa dhakhtar tilmaamayaa in aad dhaawac qabto. Si aad mutaysato arinta dhaawaca waa in aad haysataa warqada aqoonisiga ee loo yaqaano Transit ID, ama warqada caafimaadka, ama warqada aqoonisga ee California DMV Placard ID. Lcagta dadka waayeelka ah iyo dadka curyaamiinta ah waa:

- Lacag cad $1.00
- Kaarka bisha $14.50

Tukaanka Gaadiidka cinwaankiisu waa:

102 Broadway (Meesha ay Broadayway iyo 1st ika gooyaan)

Wakhtiga la furo tukaanku waa: Isniin – Jimco 8:30 aroornimo – 5:00 galbnimo Sabti – Axad 10:00 aroornimo ilaa 4:00 galabnimo. Telefoonku waa 619-234-1060.

Tigidhada baska lagu raaco iyo wixii maab ah waxad ka hele kartaa tukaanka gaadiidka.

Gaadidka Gobolka Telefoonkiisu waa: (619) 223-3004
Soo wac teleefonkan si laguugu soo diro maabka baska, ama jadwalka wakhstiga baska.

Macluumaad Deg Deg ah

Telefoonkan wxaad soo wici kartaa marka aad u baahato wakhtiyada baska uu soo maro agtaado. Waa in aad ogaataa baska aad u baahntahy lamarkiisa iyo maxadada baska.

Wareejin (Trasfere)
Hadii aad u baahan tahay in aad raacdo in ka badan hal Bas, waxaa quamn in aad warsatao wadaha Baska tigidh wareejin, marka aad so okortid Baska. Haddaba marak aad soo gashid Baska labaad waa inaad u dhiibtaa tigidhka wadaha Baska. Hadii aad u baahatay warejin 3 xaad u sheeg wadaha, markaasi wadaha ayaa kuu so celin doonta tigidhka. Waxaad u isticmaali kartaa tigidhkaasi Bask u jeeda jihada aad u socoto.
Waxaa kale oo aad u isticmaali kartaa warejintaasi tigidh jiho kasta oo ay ka reeban tahay meeshii aad horey ugu isticmaashay. Tigidhkan warejinta waa inaad isticmaasha muddo saacad ah gudahood.
Hadii aad haysato tigidhka diyaarka ah (ready Pass) ee bisha, uma baahnid wareejin tigidh.

Fuulitaanka Baska:

Goob kast oo uu Basku istaago oo ka tirsan gaadiidka dadweynah ee San Diego, waxaa ku qoran calaamada sheegaysa jidka Baska (khadka), iyo macluumaad kale oo ay ka mid yihiin in Basku leeyahay fududeyn dadka naafada ah (curyaamiinta gaadhigooda) iyo in lala fuuli karo Baaskiil.
Marka uu Basku soo istaago u haadi gacanta wadaha oo tus inaaad rabto inaad raacdid, dhinciisan u jeedso.Iska hubi lanbarak Baska, maraasna isku hubso inaad raacdid.

Ka soo degida Baska:
Hadii aadan hubin meesha aad ku degayso, u sheeg wadaha oo ka codso inuu kula socodsiiyo marka la gaadho goobta aad rabtid. Haddii aad ogtahay goobta aad rabtid taabo calaamda cadaynaysa joogsiga. Ka deg baska alabaabak dambe.

Gaadiidka loo yaqaan trolley

Gaadiidka loo yaqaan trollrygu (tereynka cas) waa hab aad u dheereeyaa oo aad ku gari kartid danahaaga.. Has ahaatee trooligu waxa uu maraa meelo yar. Waxa jira laba qaybood:

Trooliga Bari oo ukala socda magaalda Santee ilaa iyo fars magaalka San Diego
Trooliga waqqoyi oo ukala socda magaalada Mission Valley ilaa Tijuana.

Labada tereyn waxay isku gooyaan faras magaalka magaalada. Lacagta teraynku nwaxa ay ku xidhantahay inta meelood oo aad u raacdo. Lacagtu waxa weeye:

- Faras magaalka San Diego oo qudha: $1.25
- 1 maxadad : $1.50
- 2 maxadadood: $1.75
- 3 maxadadood: $2.00
- 4-10 maxadadood $ 2.25
- 11-19 Maxadadood $2.50
- 20 Maxadaddo iyo wixii ka badan $3.00
- Dadka waayeelka ah iyo dadka curyaamiinta ah waxa weeye $1.00 dhinac kasta

Waa in aad hore u iibsataa tigidhka aad ku raacayso torooliga. Maxadad kasti waxa ay leedahay meel laga iibsado tigidhada. Maxadadha qaarkood waxa jooga qof lacgta qabta. Waxaad kaloo ka abiisan kataa tigidhka torooliga tukaanka gaadiidka. Sicirku waa:

- Dadka waawyen $58-84.00
- Dadka dhalinta yar $26.00

- Dadka waayeelka ah iyo dadka curyaamiinta ah $13.50

Tareenka loo yaqaan Coaster

Coasterku waa tareen u kala socda degmada North County iyo faras magaalka magaalda.Tereenku waxa uu ka shaqeeya magaalooyinka Oceanside, Carlsbad, Encinitas, Solana Beach, Sorrento Valley, Old Town, iyo faras magaalka magaalda San Diego. Teraanka Coaster ku waxa uu shaqeeyaa Isniinta ilaa iyo Sabtida. Tigidh ka waxad ka iibsan kartaa maxadada aad tereenka ka raacayso.

Lacagtu waxay u dhexaysaa $3.75 - $5.25 iyadoo ku xidhan inta maxadadood oo aad u kala socotid.

Kaarka bisha waxa weeye: $105 - $144.00
Dadka dhalinta yar waxay ku raaci karaan $72.00 bishii
Dadka waayeelka ah iyo dadka curyaamiinta ah $36.00

Hadii aad u baahantahay macluumaad ku saabsan Coaster ka soo wac telefonkan (619) 233-3004 ama 1800-COASTER.